Maxay tahay sababta ilmahayga warbixitiisa horukaca ee dhinaca akhrinta iyo qoraalka ay laba qaybood ugu kala qoran yihiin.

Waxyaabaha lagu cabiro horukaca

Horukaca ilmahaaga ee dhinaca akhrinta iyo qoraalka waxaa lagu cabiraa laba qaybood oo ka mid ah warbixinta horukaca: waa qaybta Akhrinta iyo Qaybta qoraalka, iyo qaybta horumaka ee luqada English ka. Waxyaabaha lagu cabiro horukaca way ku kala duwaanaan karaan labada qaybood. Hadii Waxyaabaha lagu cabiro horukaca ay labad qaybood ku kala duwan yihinnku, waydii macalinka ilmahaaga wxiii su'aal ah ama sharaxaad dheeraad ah.

Qaybta Akhrinta iyo Qoraalka

Qaybta Akhrinta iyo Qoraalka ee warbixinta horukaca waxay cabiraysaa horukaca ardayga ee akrinta iyo qoraalka iyo inuu gaarsiisanyahay heerka iyo darajada fasalka uu dhigto. Ardayga waxaa laga filyaa inuu gaadhsiisan yahay heerka fasalka uu dhigto.

Qaar ka midd ah ELLs waxaa laga yaaba inay wax ku dhigtaan luqada Spanish ka. Kuwa kale ee ELLs kana waxay wax ku dhigtaan English. Wax yaabaha horumarka lagu cabirana waxaa loo isticmaalayaa luqada ardaygu wax ku dhigto.

Qaybta Horumarka ee Luqada English ka

Warbixinta Horumarka ee qaybtan waxay cabiraysaa horumarka ELLs ee la xiriirta hanashada khibrada luqada English ka sida maqalka, akhrinta, hadalka iyo qoraalka. Horuckana waxaa lagu cabiraa hormarka aad ka gaadhay ELL's iyadoo la fiirinayo heeerka aqoontaada iyo hanashada luqada English ka. Heerarka waxay kale yihiin bilow, dhexdhexaad iyo mid sare oo aan ku xirnayn heerka qofu joogo. Tusalle ahaan, qofka fasalka kowwad ah iyo kan dhigta fasalka shanaad waxay labduba noqon karaan heerka koowaad ee aqoonta luqada English ka.

Maxay ka macna tahay marka uu ELL yahay mid ah bilow, ama dhex-dhexaad ama Sare ee aqoonta luqada English ka

ELLs ka ah heerka bilow ee luqada English ka:

Waa mid Inta badan dhagaysi ah, intii dhowr usbuuc ama bilood ka hor inta aadan dadka kula hadlin luqda.

- Inaad dadka kula xiriito hal ama laba eray, oodhaah yar ama tilmaan.
- Wuxuu isticmaalaa tilmaan , sawir, ama isu bar-bar dhigid, ama qoraal kooban
- Ka qayb qaato hawlaha fasalka oo ka mid yihiin Heesaha, iyo Akhrinta oo kale.
- Adoo awooda inaad sheegto akhbaarta muhiim ka ah ee naftaada sida, magacaaga iyo da'daada.

ELLs ka ah heerka dhexe ee luqada English ka:

- In si fiican ugu hadlo luqada marka caadi loo sheekasanayso. Tusaale ahaan uu la hadlaa ardada fasalka la dhigata, su'aal waydiiyaa, jawaabna u celiyaa, Kana hadli karaa mawduucyada caadiga ah.
- Ka qayb qaataa wada hadalka fasalka dhexdiisa, isticmaalaa na weedh kooban
- Ahriyaa sheekooyinka caanka ah.
- Ku hadlaa, qoraana weedho asaga oo samaynaya khaladaad uusan samaynin qofka u dhashay luqada English ka.
- Qori karaa sheekooyin gaa-gaaban oo leh bilow, dhex-dhexaad iyo dhamaad.

ELLs ka ah heerka sare ee luqada English ka:

- Wuxuu qoraa weedho iyo sheeko asgoo isticmaalaya hingaad iyo qawaacid sax ah.
- Sheegi karaa sheekooyin ay ku jirto warbixin dheer iyo erayo ku haboon, iyo luqad sax ah
- Wuxuu qoraa weedho iyo warbixin sax ah oo ku saabsan wixii uu bartay.
- Wuxuu fahmi karaa sheekada caadiga ah, laakin ma fahmi karo luqada heerka waxbarasha sare
- Fahmi karaa luqada gooni u ah English ka sida kaftanka, sarbeebta, maah-mmah

Sideen u caawin karaa ilmahayga?

Qaybaha soo scoda waxa lagu soo koobay afar heer oo la xiriia horumariinta luquda English ka ee gobalka Colordo, iyo talooyin ah sidii uu waalidku uga caawin karo ilmaha inuu heerkaas gaaro.

Heerka 1—Dhagaysi: Dadka baranaya Luqada English ka waxay dhagaystaan warka ama akhbaarta iyo sidii ay u fahmi lahaayeen ayaga oo isticmaalaya ilo kala duwan una adeegsada dhinaca waxbarashada iyo nolasha guudba.

Talo:

- La hadal ilmahaaga loo kula hadal luqadaada (guriga lagaga hadlo). Ilmaha waxay u baahan yihiin in ay wax dhagaystaan oo ka dhagaystaan dadka luqada guriga si heer sare ah ugu hadla oo ayna la sheekaystaan.
- U isticmaal wakhtiga cashada habeenkii mid qoyska oo dhan wadaagan sheeko, isdhagaystaan, su'aalana is waydiiyaan.
- Bar ilmahaaga heesha, iyo heelooyiin ka carabka jilciya, Erayada. Ka caawi ilmaahaaga inay ka digtoonadaan qaabka ay dhawaaqayaan erayda.

Heerka 2—hadalka: Dadka baranaya Luqada English ka waxay ku hadlaan warka ama akhbaarta iyo sidii ay u fahmi lahaayeen ayaga oo isticmaalaya ilo kala duwan una adeegsada dhinaca waxbarashada iyo nolasha guudba

Talo:

- Kula sheekayso ilamahaaga luqadaada hooyo. Aaas-aas adag oo luqada guriga ah, waxay ilmaha ka caawisaa inuu sahal u barto English ka. Ku hadlaka luqad shisheeye waxay hor istaagtaa wada hadalka iyo sheekada.
- Ilmahaaga Luqada guriga ugu sheeg wax walba waxa uu yahay iyo waxa loogu tala galay. Dheh sedan oo kale, "meeshan nalka ayaa laga shidaa. Waydii oo dheh "ma ii sheegi karta kan waxa loogu tala galay"?
- Bar ilmahaaga heesha, iyo heelooyiin ka carabka jilciya ee luqada guriga laga hadlo.
- Waydii ilmahaaga su'aalo ku saabsan Dusiga, waxa ay jecelyihiin, buugta ay akhriyaan iyo television ka ay daawadaan.
- U fiirso waxa ay cruurtaadu ku hadlayso, waydii su'aalo, ku guubaabi inay hadlaan.
- Hadii uu ilmahaagu baranyo badda, kala hadal badda. U sheeg mar aad badda aadeen ama qof kale aaday. U sharax badda, ciidda, Malayga, Hirarka iyo xaywaanka badda ku nool.
- Waydii ilmahaaga erayada English ka ah ee ay dugsiga ka soo barteen. Erayda ugu fasir luqadaada una sharax macnahooda. Taasi waxay ilmahaaga ka caawinaysaa xusuusta erayada.

Heerka 3 Akhrinta: hadalka: Dadka baranaya Luqada English ka waxay ku hadlaan warka ama akhbaarta iyo sidii ay u fahmi lahaayeen ayaga oo isticmaalaya ilo kala duwan una adeegsada dhinaca waxbarashada iyo nolasha guudba

Talo:

- Tulsaale u noqo adoo ahkrinaya Jaraa'idyada kala duwan, buugta ku daabacan luqada aad guriga ka hadasho.
- Aad oo ka soo qaado buug maktabada ood ka heli karto buugaag luqado kale nooc ah
- La wadaag ilmahaaga sheeko dhaqan kaaga ah oo la mid tan dugsiga la dhigo.. wadamada aduunku sheekooyin fara badan by wadaagaan..
- Mar walba ilmahaaga ii akhri dheh buuga uu jecelyahay.
- Ilmahaaga la qaybso buugta uu guriga la yimaado. Kale hadal sawirada, iyo waxa ay matalayaan, mushkiladaha. Ilmahaaga waydii inuu qiyaasi karo waxa ay sheekadu ku saabsantahay. Waxa ka tilmaan sheekada, suaa'lana ka waydii ilmahaaga.
- Television ka shid farta hoos lagu soo qoro oo dadka Television ka muuqda waxay ku hadlayaan soo qorta.
- Dami Television ka marka aad wax akhrinaysaan. Wakhtiga wax akhrinta waa in television ka iyo Video ba la damiyaa.
- Luqadaada ka raadi erayo isu eg oo hadana isku macna ah. Tusaale ahaan erayga *observe* ee luquada English ka iyo *observer* ee luqada Spanish ka waa isku macne waana isu egyihiin. Eryadaas waxaa loogu yeeraa *cognates*. Nidaamkan wuxuu ilmahaaga ka caawinayaa inuu fahmo eryo badan oo English ah.

Heerka 4 Qoridda: hadalka: Dadka baranaya Luqada English ka waxay ku hadlaan warka ama akhbaarta iyo sidii ay u fahmi lahaayeen ayaga oo isticmaalaya ilo kala duwan una adeegsada dhinaca waxbarashada iyo nolasha guudba.

Talo:

- Qalabka wax lagu qoro sida waraaqaha, qalinka, iyo qalin laabiska, crayons waa in mar walaba ilmahaagu uu haysto si uu isticmaalo. Ku guubaabi ilmahaaga inuu wax qoro oo sawiro. Inta uu ilmahaagu wax qoro waa inta uu sii fiicnaanayo.
- Ku guubaabi ilmahaaga inuu u qoro waraaqo saaxiibadiis iyo dariskiisaba.
- Ku guubaabi ilmahaaga inuu isticmaalo cognates Marka ay wax qorayaan. (ka fiiri sharxaada cognates Heerka 3—Akhrinta.)
- Ilmahaaga wax sawir ku dhex, ka diban wax ha ka qoro sawirka uu sawiray.
- *Ilmahaag waydii inuu qoro erayo, oodaah iyo sheekooyin ku saabsan sawirka ay sawiraan. U sheeg ilmahaaga inay waxa ay qoreen ay u akhriyaan dadka kale. Macna ma laha hadii ayna sax u higaadin Karin, mudo ka dib way saxayaan.*
- Sii ilmahaaga dhiiri galin iyo guubaabin inay mar walba isku dayaan. Qoraaku waa shaqo adag.

Tusaalyant waalidka ee Warbixinta ku salaysan Heerarka - (Dugsiga Hoose)

Horumarinta Luqada English ka (ELD)

Dadka baranaya Luqada English ka (ELLs) horumar ay ku talaabsadaan kaaso lagu cabiro heerar la saadaalin karo oo la xiriira hanashada luqada English ka. Warbixinta ELD ee Dugsiyada Denver ee Dawlada waxay cabiraan heerarka ELLS' oo ku cabiraan heerarka kale aha Bilow, dhex-dhexaad iyo heer sare, iyo dhagaysi, qoraal, hadal iyo akhrin heer ka sare ah. Heeraka ku jira warbixinta Horukaca waxay la mid Yihiin heerarka ELD ee Gobolka Colorado..



Dugsiyada Dawlada ee Denver

Denver Public Schools

Elementary ELD Parent Guide
Somali